



Caymiska cusub ee MaineCare ee loogu talagalay Muhaajiriinta waa Diyaar!

Laga bilaabo **1-da Luulyo 2022ka**, dadka dakhligoodu hooseeyo ee da'doodu ka yar tahay 21 jir ama uurka leh waxay xaq u leeyihiin inay helaan dheefaha MaineCare oo buuxa, iyada oo aan loo eegin xaaladdooda socdaalka!

Waa maxay MaineCare?

MaineCare waa barnaamijka Medicaid ee gobolka kaas oo bixiya **caymis caafimaad oo bilaash ah iyo mid jaban** oo loogu talagalay dadka ku nool Maine ee buuxiya [shuruudaha u-qalmitaanka](#) oo ay ku jiraan dakhliga qoyska, da'da, ama uurka.

Yaa qaadanaya caymiska?

Carruurta da'doodu ka yar tahay 21 jir iyo **dadka uurka leh** ee u qalmi doona MaineCare ama CubCare (CHIP) marka laga reebo xaaladdooda socdaalka. Tan waxaa ku jira dadka aan sharciga haysan iyo kuwa aan weli codsan magan-galyo ama aan weli xaqiijin karin sharcigooda socdaalka.

Sideed isu diiwaan gelin karta?

Haddii aad hore u haysatid daryeelka degdegga ah ee MaineCare oo aad ka yar tahay 21 jir ama uur leedahay, waxa si toos ah laguugu qori doonaa caymiska cusub. Haddii aad leedahay daryeelka degdegga ee MaineCare oo aad uur yeelato, waxaa muhiim ah inaad sida ugu dhakhsaha badan u ogeysiiso Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services, DHHS).

Haddii aadan haysan Daryeelka Degdegga ah, waxaad ka dalban kartaa MaineCare online halkan [My Maine Connection](#) ama waxaad kasoo dejisan kartaa codsiga [halkan](#) dabaddeedna u dir DHHS ado adegsanaaya boostada, iimaylka, ama keen xafiiska DHHS.

Isdiiwaangelintu ma saamayn doontaa kiiskayga socdaalka?

Maya! Xaaladdaada socdaalka looma wargelin doono maamulada federaalka. Iyo helitaanka caawimada daryeelka caafimaadka, cuntada, guriyeynta, iyo baahiyaha kale ee aasaasiga ah ma saamayn doonto awoodaada aad ku heli karto *kaarka cagaaran* ama dhalashada Maraykanka mustaqbalka

Ilaa muddo intee ah ayaad sii haysan kartaa caymiskaaga cusub?

- **Carruurta:** Ilaa inta dakhliga qoyskaagu uu ku jiro habka u-qalmitaanka, waxaad sii haysan kartaa caymiskaaga ilaa aad ka gaadhayso 21 jir. Waxaad u baahan doontaa inaad dhamaystirto shahaadadaada sanadlaha ah ee DHHS. Haddii heerkaaga socdaal uu isbedelo, waxa laga yaabaa inaad u qalanto qayb ka duwan MaineCareka ah.
- **Dadka Uurka Leh:** Waxaad heli doontaa 12 bilood oo daboolista caymiska dhalmada kadib ah dhalmada kadib ama kadib marka uu uurku dhamaado. Dhallaankaagu waxay si toos ah xaq ugu yeelan doonaan MaineCare hal sano kadib dhalashada.

Yaa hadda u qalma MaineCareka buuxa?

- **Muwaadiniinta Maraykanka** *iyadoon loo eegayn xaaladda socdaalka ee xubnaha qoyskooda*
- **Qaxootiga & dadka Magangalyada helay**
- **Magangalyo doonka** *ka yar 21 jir ama dadka uurka leh*
- **Deganeyaasha sharciga ah** *ee haystay kaarka cagaaran in ka badan 5 sano ama haysta kaarka cagaaran in ka yar 5 sano oo uur leh ama ka yar 21 sano*
- **Kuwa aan sharciyaysneyn, aan bilaabin nidaamka magangalyada,** *ama haysta xaalad socdaal oo aan la hubin oo da'da ka yar yihiin 21 jir ama uur leh*
- **Haitian ama Kuuban soo-galootiga**
- **Kuwa ka badbaaday rabshadaha qoyska** *ee ku sugnaa Maraykanka in ka badan 5 sano ama ka yar 21 jir ama uur leh*
- **Dadka xabsiga lagaga sii-dayay sii-daynta la kormeero** *Maraykanka gudahiisa ugu yaraan hal sano oo ka yar 21 jir ama uur leh ama kuwa lagu sii daayey sii-daynta la kormeero Maraykanka dhexdiisa ugu yaraan 5 sano*

Ma u baahan tahay Caawin?

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo isu-diiwaangelinta MaineCareka, fadlan kala xidhiidh Macaamiisha Daryeelka Caafimaadka La awoodi karo ([Consumers for Affordable Healthcare](#)) halkan: 1-800-965-7476.

Haddii aadan weli u qalmin MaineCareka buuxa oo aad rabto inaad ku biirto dagaalka loogu balaadhinayo MaineCare DHAMMAAN muhaajiriinta, *iyadoon loo eegin da'da ama heerka socdaalka, fadlan kala xiriir Alex Carter Maine Equal Justice, acarter@mejp.org.*